

Talooyinkan tobanka ah waxey ku siinayaan awood weyn oo aad ku xakameyso isticmaalkaaga tamarta korontada, adigoo saameyn yar ku reebaya cimilada iyo adigoo lacag badani boorsada jeebkaaga kugu soo hareyso. Bal adiguba tijaabi laftaada !

1. Kululaynta guryaha

- Haddii aad darajada heerkulka guriga gudhiisa hoos u dhigto hal darajo, waxaad hoos u dhigeysaa kharajka kululaynta guriga boqolkiiba shan.
- Kulaylka wuxuu qolalka guriga aad ugu fidayaa haddii aaney alaabta fadhiga hor oolin qalabka wax diiriya ee gidaarka hoose ee qolka.

2. Biyaha kulul

- Haddii aad qubeysato toban daqiiqadood maalintiiba ,waxaa taa ku baxeysa 2000kr sanadkiiba.
- Adigoo tubada(qasabada) biyaha iyo tan qubeyska ku rakiiba afka shabaqa ee biyaha socodkiisa xakameeya kuuna dhaqaaleynaya baa waxaad kala badhi kartaa isticmaalka biyaha.
- Ku hagaaji darajada heerkulka kululaynta biyaha ilaa 60 darajo.

3. Qalabyada ku taagan xaalad nasasho (vilo-läge)

- Qalabka ku sugan xaalad heegan (stand-by läge) wuxuu si aan loo baahneyn u isticmaalaa korontada . Taasi waxey quseysaa telefishanada iyo qalabka leh kontaroolid meel fog (fjärrkontroll),kompiyuutarada iyo qalabka lagu cabbeeyo baatariga. Dayacaaddan (Isticmaalkan) korontada - ayadoon laga faa'iideysaneyn- waa kharaj si aan loo baahneyn u baxaya. Iska bakhitii dhammaantood !
- Isticmaal fiilo xiriiriso (grenkontakt) wadata danabjebiye damiya korontada marwalboo qalabka aan la isticmaaleyn.

4. Cunto karinta

- Mashiinka biyaha kariya waa habka ugu tamar dhaqaaleyn fiican ee biyaha loo karkariyo.
- In la daboolo digsigu cuntada lagu kariyo wuxuu keydinayaa boqolkiiba 30 tamarta baxeysa marka loo barbardhigo karinta dabool la'aan.
- Ku dhalaali cuntada qaboojiyaha caadiga ah (kyllen) meesha aad ka isticmaali laheyd foornada maykarooqa yar.

5. Kaydinta cuntada

- Qaboojinta caadiga (Kyl) iyo qaboojinta barafeynta (frys) waa hab tamarcune dhab ah maxaa yeelay oo waxey u shaqeeyaan si aan kala go' laheyn . Soo iibso qalabka nooca tamarta dhaqaaleeya ee sita calaamadda A+ ama A++ marka aad iska bedeleysid kuwii hore.
- Iyada oo heerkulka qaboojiyaha qeybta barafka (frys) laga dhigayo mid ku habboon(-18 dhibcood) , qeybta qaboojiyaha caadiga ahna (kyl) ku dhawaad (+5 dhibcood) iyo iyada oo boodh laga kiciyo dhinaca gadaal ayaa isticmaalka korontada hoos ugu dhacayaa.

6. Iftiiminta

- In leedhadhka lagu bedelo kuwa ku shaqeeya tamar hoose iyo leedhadhka LED ayaa ah hab sahlan oo loo yareeyo kharajka tamarta. Waxaad ka heli kartaa boqolaal karoon dheeraad oo aad ka keydsato hoos u dhigga kharajka korontada ee leedh walboo aad u bedesho nooc ka tayo & dhaqaaleyn fiican.
- Dooro oo isticmaal leedhadh iyo dabkoronto ku siinaya iftiin wanaagsan.
- Ka fogoow isticmaalka nalka guluubka ah iyo kuwa haloojiinka ee danab badan lumiya ,gaar ahaan marka inftiimintu ay waqti dheer shidnaaneyso.

7. Maydhista weelasha iyo dhar dhaqidda

- Marka aad isticmaaleyso makiinada dharka dhaqda iyo tan alaabta dhaqda ,keydi tamarta adiga oo makiinada buuxinaya, heerkulka dhaqistana ka dhigaya mid hooseeya.
- Xooji wareegga makiinada adigoo kordhinaya wareegga si ay dhaqso u qalasho markaana ay koronto yar ku baxdo.

8. Kharajka korontada

- Soosaarista korontadu waxey mashaakil badan ku dhalsaa deegaanka . Adiga oo doorbidaya isticmaalka koronto laga soo saaray ilaha tamarta dib loo isticmaali karo (förnybara energi källor) sida tamarta korontada dabaysha laga dhaliyey iyo tamarta biyaha laga dhaliyey (tus.Koronto deegaanka u wanaagsan- Bra Miljöval el) ayaa markaa waxaad dadaal u muujin kartaa deegaanka. Iska eeg heshiiska aad la leedahay shirkadda korontada waxaadna si firfircooni ah u doorataa shirkadda korontada qeybisa ee ku habboon, markaana waxaad hoos u dhigi kartaa kharajka korontada iyo culeyska saaran deegaanka.

9. Nooc tamar cusub ?

- Haddii aad ku nooshahay guri gaar aad u leedahay oo gurigaana lagu kulayliyo koronto amd saliid si toos ah u timaada - isku day oo ka feker inaad bedesho. In laga soo jiito habka kululaynta gobolka (rugta guryaha xaafaddo dhan wada kulaylisa),rakibaadda habka shidaalka laga soo saaro geedaha (pellets-system) iyo mashiinka kulaylka soo nuuga(värmpump) ayaa badanaaba roon, siinayana deegaanka faa'iido badan. Waxaad kululaynta ku dhameystirtaa kulaylka qorraxda.

10. Gaadiidka

- Marka aad baabuur wadeyso - isticmaal gawaarida deegaanka u roon markaana si deggan oo aayar ah u wad adigoo isticmaalaya taayarada baabuurta ee leh xoog cadaadis ku haboon markaa waxaad hoos u dhigi kartaa isticmaalka shidaalka ilaa 20 boqolkiiba.
- Raacista tareenka ka doorbid raacista dayaaradda waayo tareenku 50 jeer buu tamarta kaga roon yahay dayaaradda. Isku day inaad baaskiil kaxeysato in badan!

